

**XEERKA N. 138 rep.**

**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**  
**XOGHAYAHA DUUD**

MARKI UU ARKAY wareegtada madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 diseembar 1952, n. 2357;

MARKI UU ARKAY qaybta 9-aad farqadeeda saddexaad ee wareegtada la soo xusay;

WAXA LOO ARKAY fursad in la abuuro dugsi ku takhasusay diinta Islaamka oo ku yaal Soomaaliya diyaariyana garsoorayaasha shariicada iyo wacdiyayaal;

WAXAA LOO GARTAY in lagu cabir qaado dugsiyada sare ee Soomaaliya;

**WUXUU XEEREYEY**

**Qod. 1.**

Magaalada Muqdisho waxa laga sameeyay “Dugsiga Akhlaaqda Islaamka” ee barashada cilmiga diinta iyo shareecada Islaamka.

**Qod. 2.**

Waqtiga dugsiga soconayo waa afar sano oo loo qaybshay:

- a) labada sano ee ugu horreysa waa diyaarin guud ee ardayda;
- b) Laba sano ee xigta waxa loo qaybiyaa laba takhasus: garsoorayaasha shariicada iyo wacdiyayaasha.

**Qod. 3.**

Ku diiwaangelinta sanadka koowaad ee dugsiga waxay ku xiran tahay ka gudbidda imtixaanka aqoonta guud si loo hubiyo in marashixiintu ay awood u leeyihiin inay si wanaagsan ula socon karaan dowrooyinka.

**Qod. 4.**

Dhamaadka dowlada afarta sano ah, imtixaanno ayaa dhacaya si loo helo Dibloomaha shahaaddada Dugsiga.

**Qod. 5.**

Nadaamka dugsiga ee dejinayo dowrooyinka iyo barnaamijyada wax barista ayaa la ansixin doonaa.

**Qod. 6.**

Dowrooyinka tababar dheeri ah ayaa loo diyaarin karaa ardayda ka qalin jabisay dugsiga, iyo dowrooyin dib u cusbooneysiin ah oo loogu tala galay kuwa taariikhda wareegtadan mar horeba haya howlaha Qaadi.

**Qod. 7.**

Kharashaadka la xariira ka shaqeysiinta Dugsiga, waxa miisaami doonaa qodobka 64aad ee miisaaniyadda sannad maaliyadeedka min 1 luulyo 1953 - 31 disember 1954 iyo qodobbada la midka ah ee sannad maaliyeedyada xiga.

Muqdisho, 11 setembar 1953.

MAAREEYE  
**I. Spinelli**

Arkay diwaangelinta n. 96 ee R. D.

17 setembar 1953.

---